



midka u dagaalama si ay kalimada Ilaahay kor u ahaato ayaa dar Ilaahay u dagaalamay

Abii Muusa Alashcari-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- ayaa la weydiiyey ninka u dagaalama geesinimo, kan ku dagaalama qabyaalad iyo kan ku dagaalama is tustus, keebee dar Ilaahay dagaalkiisu ahaanaya?

wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: "midka u dagaalama si ay kalimada Ilaahay kor u ahaato ayaa dar Ilaahay u dagaalamay."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- waxaa la weydiiyey sida ay isu khilaafsan yihiin ujeedooyinka dadka dagaalamaya, ninka u dagaalamaya geesinino ama qabyaalad, iyo kan uu ka yahay dagaalku si loo arko meesha uu bulshada ka joogo iyo wixii la mida, keebaa jidka Ilaahay ku dagaalamay? Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: wuxuu u sheegay midka dar Ilaahay u dagaalamay waa kan ku dagaalamay si kalimada Ilaahay kor u ahaato.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/2969>